


Taltjänst

Waxaan annagu u joognaa/u shaqaynaa dadka naafada ka ah codka, hadalka ama luqadda.

Waxaanu bixinaa Taltjänst oo lacag la'aan ah oo loogu talagalay dadka ka waa weyn 18 sano. Taltjänst waa qayb ka mid ah Baxnaaninada & Caafimaadka ee Gobolka Stockholm.

Taltjänst wuxuu bixiyaa taageero isgaarsiineed

Waxaad isticmaali kartaa Taltjänst haddii uu kugu adag yahay hadalku, inaad fahamto marka ay dadka kale hadlayaan, akhrisku iyo qoraalkuba. Adiga ayaa go'aan ka gaaraya arrimahaaga, Taltjänst kuma siin karo wax talo ah ama kaama caawin karo inaad go'aan adigu gaarto.



Sidee ayey Taltjänst kuu fahmi karaan adiga?

- Annagu waanu ku baranaynaa adiga iyo habka aad dadka ula xiriirto.
- Waxaanu ku siinaynaa taageero isgaarsiineed iyada oo lagu salaynayo baahidaada iyo xaaladaha, tusaale ahaan in lagu waafajiyo luqadda iyo in la isticmaalo sawirada

Taageero nooc ee ah ayey bixin karaa Taltjänst?



Taageerada hadalka

Turjubaanka ayaa sii faah-faahinaya waxaad aad leedahay marka loo baahdo. Turjubaanka wuxuu sidoo kale kuu sharaxayaa haddii ay kugu adag tahay inaad fahanto waxa dadka kale leeyihiin.



Taageerada telefoonka

Turjubaanka ayaa joogaya inta lagu jiro wada hadalka taleefanka. Turjubaanku wuxuu kaa caawinayaa gudbinta telefoonka (telefonväxel) wuxuuna kuu faah-faahinayyaa ama kaa gudbinnayaa/kaa sheegayaa waxaad rabto inaad tiraahdo. Turjubaanku wuxuu samaynayaa qoraallo gaaban inta lagu jiro wadahadalka.



Taageerada akhriska- iyo qoraalka

Turjubaanka ayaa kaa caawin doona buuxinta foomamka, iyo sidoo kale akhriska iyo qoraalka waraaqaha iyo iimaylka. Waxaanu kuu sharixi doonaa ereyada adag waxaananu sidoo kale qori doonaa qoraallo gaagaaban.



Waxaan ku caawinaynaa dadka ay ka haysato dhibaatooyinka akhriska iyo qoraalka ee ku salaysan dhibaatooyinka ldhinaca uqadda, sida (dyslexi) ama mushkilad kuqaddeed (språkstörning).

Ma aqbalayno dadka akhriska iyo qoraalka ku adag ee ku salaysan garashada

Taltjänst meelo kala duwan ayuu hawlo ka fulin karaa

Waxaan ka fulin karnaa hawlaha gurigaaga, xafiiskayaga ama bulshada dhexdeeda. Waxaanu qabanaa shaqada turjubaanka maalmaha shaqada 8.30-16.30.



Guriga



Xafiiska




Bulshada

Taltjänst wuxuu ahaan noqon karaa in tusaale la booqdo/la

aado:



Bangiga



Daryeelka



Hey'addaha

bukaanka

Way wanaagsan tahay in la ogaado



Uma baahnid in Taltjänst lagu soo gudbiyo si aad noogu timaado.
Si toos ah noola soo xiriir annaga.



Waa lacag la'aan in la isticmaalo Taltjänst.



Waxaa na saaran waajibaad sir haynta shaqada oo macluumaadka dhammaantii waxaa loo maareeyaa si qarsoodi ah.



Waxaan nahay dada dhexdhexaad ah oo waxaanu qabanaa waxaad rabto oo keliya.



Taltjänst wuxuu hawlo shaqo ka qabtaa gobolka oo Stockholm oo dhan ah.

Waxaanu nahay dadka ka shaqeeya Taltjänst



Amanda Näslund
Turjumaan



Carin Engström
Turjumaan



Ikran Farah
Turjumaan



Elsa Åkerhielm
Turjumaan




Gunilla Kvist
Sheefka qaybta



Kim Röjnémark Wirell
Iskuduwaha

Kala xiriir Taltjänst



Sabbatsbergs sjukhus
Olivecronas väg 5
Hiss B, plan 2



08-123 351 20



08-123 496 10



www.habilitering.se/taltjanst



taltjanst.slso@regionstockholm.se

Halkan ayaad naga helikartaa Taltjänst



Tareenka gudaha iyo hareeraha magaalada iyo kan dhulka hoostiisa mara (pendeltåg och tunnelbana)

Raac kan aadaya Stockholm Odenplan. Qiyaastii 10 daqiiqo ayaa loo lugeeyaa Odengatan iyo Dalagatan.

Raac baska lambarkiisu yahay 61 ilaa maxadada baska ee Sabbatsbergs Sjukhus

Haddaad gaariga ku imanayso

Qaado wadada Olivecrona, ee sii marta Dalagatan.

Baabuurka dhigo baarkeerinka cisbitaalka oo ku yaala afaafka hore ee albaabka ama waddooyinka u dhow.

Taltjänst

habilitering.se/taltjanst

Sabbatsbergs sjukhus

Olivecronas väg 5, hiss B, plan

208-123 351 20

taltjanst.slo@regionstockholm.se

Bildkällor: Papunets bildbank, www.papunet.net; ☒ Sclera www.sclera.be; © Sergio Palao / CATEDU (ARASAAC)